

Isbeddel Muhiim ah oo Ku Yimid Gargaarada Cuntada

Laga
bilaabo:
Maarso

Taariikhda

Tani iyo bilowgii cudurka baahsan ee COVID-19, qoysaska SNAP waxay helayeen labo lacagood oo dheefta cuntada ah bil. Lacag bixinta u horreysaa waa gargaarka SNAP ee caadiga ahaa, iyada oo lacag bixinta labaad ay tahay gargaarka cuntada ee degdegga ah (haraan loogu wici jiray Qoondeynta Xaalada Degdega ah) ee la xiriira xaalada degdega ah ee COVID-19.

Maxaa isbeddelaya?

Feebarwari 2023 ayaa noqon doontaa bisha ugu danbeysa ee dawlada federaalku u ogolaan doonto Oregon inay bixiso Qoondeynta Xaalada Degdega ah. Dadka reer Oregon waxay sii wadan doonaan in ay helaan gargaarka SNAP ay leeyihiin ee caadiga ahaa. Tani ma saameynayso isbeddelkan.

Macluumaad Dheeraad ah

Qaddarka lacageed ee qoondeynta xaalada degdega ah ayaa kala duwanaa isaga oo ku saleysan tirada dadka ka tirsan qoyska, laakiin qoysaska badankooda ayaa yeelan doona hoos u dhac la taaban karo oo ku yimaada gargaarka cuntada marka aysan hadda ka dib helin Qoondeynta Xaalada Degdega ah. Dadka reer Oregon ee leh koontada Nidaamka Codsadaha 'Applicant Portal' waxay qaddarka lacageed ee gaarka ah ee gargaarada SNAP sii wadi doonaan in ay ku heli karaan My Dashboard. Tallaabooyinka lagu arki karo qaddarkan lacageed ee ku jira Nidaamka Codsadaha 'Applicant Portal' waxay ku yaalaan dhinaca dambe ee boggani.

Dadka reer Oregon waxaa sidoo kale ka fiirin karaan koontadooda EBT Edge oo laga helayo www.EBTedge.com si ay dib ugu eegaan cadadka gargaarkooda SNAP. Kani waa qaddarka lacageed ee la helay intii u dhaxaysay 1-da iyo 9-ka ee bisha ee ku qoran qaybta taariikhda wax kala iibsiga/wareejinta lacagta 'transaction'.

Iyada oo sababtu tahay go'aankani oo ah mid federaal, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) ma awoodi doonto in ay kabto hoos u dhaca ku yimaada gargaarada. Waxaanu qoysaska ku dhiirigelinaynaa in ay xisaab dejin u sameeyaan si waafaqsan oo la xiriiraan ilahooda degaanka.

SNAP

Ma jiro wax isbedel ah oo ku yimid lacag bixintan. Qoyska SNAP waxay sii wadi doonaan in ay arkaan lacag bixintani oo sii socota.

Taariikhda La heli karo Inta u dhaxaysa 1^{-da} iyo 9^{-ka} ee bisha

Qoondeynta Xaalada Degdega ah

Qoondeynta waxay joogsan doontaa Maajo. Maajo, gargaargani meesha ayaa laga saari doonaa sababta oo ah hoos u dhac ku yimiday guud ahaan gargaarada cuntada.

Taariikhda La heli karo Sida caadiga ah la bixiyo 11^{-ka} ama 12^{-ka} ee bisha

Hadii aad hayso su'aalo ku saabsan gargaaradaada, waxaad Adeega Macmiilka ee ONE ka wici kartaa 1-800-699-9075 (711 TTY) ama booqo xafiiskaaga degaanka. Si aad u hesho xafiiska kuugu dhow, fadlan booqo one.oregon.gov/General/LocateAnOffice

Si aad u fiiriso gargaaradaada SNAP ee caadiga ahaa ee ku jira Nidaamka Codsadaha ‘Applicant Portal’ (haddii aad horeba u lahayd koonto)

1. Booqo **one.oregon.gov**
2. Riix **Gal**, ee ku taala dhinaca sare ee midigta xigta ee shaashada
3. Geli **username-kaaga/ cinwaankaaga email-ka iyo password-kaaga**
4. Riix **Gal**
5. Waxaad heshaa Lacagta Faa’iidada ee Bishii ee loogu talagalay SNAP.

Qaddarkani lacageed wuxuu noqon doonaa lacagta aad heli doonto bil kasta ee soconaysa ilaa laga gaarayo Taariikhdaada Dib u cusbooneysiinta ee Xigta.

The screenshot shows the Oregon Eligibility Portal dashboard. At the top, there is a navigation bar with the Oregon Eligibility logo, links to 'MY ACCOUNT DASHBOARD', 'ABOUT MEDICAL COVERAGE', 'ABOUT FOOD, CASH OR CHILD CARE ASSISTANCE', and a 'SIGN OUT' button. Below this is a secondary navigation bar with links to 'My Dashboard', 'My Actions', 'Change My Medical Plan', 'Messages', 'Community Partner Info', 'Authorized Rep', and 'Settings'. The main content area is divided into two columns. The left column contains 'Quick Links' for 'Announcements' (with 'Urgent' and 'Unread' links), 'Message Center' (with 'Inbox' link), 'Application' (with 'Start an Application' and 'Medical Pre-Screening' links), 'Contact Information' (with 'ONE Customer Service', 'Locate ODHS Office', 'Other Resources', and 'View FAQ' links), and 'Other'. The right column features a 'Report a Change in Circumstance' link, a 'Current Benefits' section with a 'Case Number' input field, and a table for 'Family Assistance'. The table has four columns: 'Benefit', 'Next Renewal Date', 'Included Individuals', and 'Monthly Benefit Amount(\$)', with a row for 'SNAP' showing a renewal date of '06/30/2023' and a benefit amount of '114.00'. Below this is a 'Medical Assistance' section with a table showing 'Individual', 'Client ID', 'Next Renewal Date', and 'Coverage Type', with a row for 'Medicare Premiums, Co-Insurance, and Deductibles' showing a renewal date of '06/30/2022'. At the bottom, there is a note about uploading documents.

Benefit	Next Renewal Date	Included Individuals	Monthly Benefit Amount(\$)
SNAP	06/30/2023		114.00

Individual	Client ID	Next Renewal Date	Coverage Type
		06/30/2022	Medicare Premiums, Co-Insurance, and Deductibles

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan taageerooyinka ka jira degaankaaga, la xiriir:

- 2-1-1 www.211info.org
- Isku xirnaanshaha Ilaha Dadka Waaweyn iyo Naafada www.adrcforegon.org/consumersite/index.php
- Helaha Cuntada ee Goobta Cuntada lagu Kaydiyo ee Oregon <https://oregonfoodfinder.org/>
- Hay'ada Waxqabadka Bulshada <https://caporegon.org/>